



Codso daryeel caafimaad:

- adigoo galaya barta internetka [Benefits.Ohio.Gov](https://www.benefits.ohio.gov),
- taleefan udir (800) 324-8680, ama
- si shaqsi ah ugutag Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska.

Ka firi xafiiska deegaanka adoo galaaya bogga [JFS.Ohio.Gov/County](https://www.jfs.ohio.gov/county).

Wac Laynka Macaamiisha ee Tooska ah ee Medicaid oo ah (800) 324-8680 si lagaaga caawiyo buuxinta codsiga ama su'aalaha kale ee aad qabto.

Macluumaad dheeri ah waxaad kahelaysaa bogga [Medicaid.Ohio.Gov](https://www.medicaid.ohio.gov).

**Ohio**

Department of  
Medicaid

---

## Adeegyada Laxariira Uurka

---

Ohio Medicaid waxay bixisaa adeegyada uurka laxariira si taageero caafimaad loosiyo hooyooyinka iyo caruurtooda, ayna usii dheer yihiin daryeelka dhalmada ka hor oo joogta ah.

Adeegyada laxariira uurka:

- waxay kordhinayaan fayadhawrka haweenka intay uurka leeyihiin,
- waxay kahortagayaan caqabadaha waxayna yaraynayaan xanuunka, sidoo kalana
- waxay kacaawinayaan ogaanshaha khataraha jira ee dhalmada waqtigeeda ka hor ama ilmo-dilanka.

Adeegyada ay heli karaan haweenka uurka leh waxaa kamid ah:

- caawimaad laga siinaayo jadwalaynta balamaha caafimaadka,
- gaadiidka lagu aadaayo adeegyada ay Medicaid bixiso,
- ugudbinta *barnaamijka Haweenka, Saqiirada, iyo Caruurta* (WIC), kaasoo siinaaya cunto caafimaad leh iyo macluumaadka laxariira cunista caafimaad leh,
- ugudbinta barnaamijka *Help Me Grow*,
- adeegyo ay qoyskaagu ka helikaraan waxbaridda
- Healthcheck ee laxariirta sida looxanaaneeyo cunugaaga, iyo
- ugudbinta adeegyada bulshada ee cuntada, dharka iyo baahiyaha kale.

Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan adeegyada la xariira uurka:

- la xariir Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska,
- la xariir qorshaha daryeelkaaga Medicaid ee maaraysan, ama
- wac Laynka Tooska ah ee Ohio Medicaid oo ah (800) 324-8680.